



TIS waxay bixisaa tarjumaad iyo fasiraad ah shan luqadood

Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay ku faraxsan yihin in ay u adeegaan arday kala duwan, oo ay ku jiraan carruur badan oo ah jiilkii u horreeyay oo Maraykan ah.

Ardayda ku koraysa guryaha aan Ingiriisi lagaga hadlin waxaa la soo gudboonaada caqabado gaar ah si uu ardaygu u guuleysto. Dugsiyada Degmada waxaa ka go'an in ay u adeegaan dhammaan ardaydooda, iyadoo aan la eegayn afkooda hooyo ama dalka ay ka soo jeedaan. Iyada oo qayb ka ah ballanqaadkani, PPS waxay soo xulatay shan luqadood oo ay inta badan ku hadlaan waalidiinta uu Ku Hadalkooda Luqadda Af-Ingiriisku Yar yahay (LEP).

Intii lagu jiray kulamadii waalidiinta-macalimiinta ee 2017-kii, Waaxdeena Adeegyada Turjumaadda iyo Fasiraadu (TIS) waxay bixisay inka badan 600 oo fasiraad oo loogu talagalay qoysaska LEP oo ah 32 luqadood.

Sida laga soo xigtay Maamulaha Adeegyada Turjumaadda, Marifer Sager, "Turjumaadda iyo Fasiraadu waa wax ka weyn luqadda oo keliya. Waa arrin sinnaan ah si loo xaqijiyo in dhammaan ardayda, iyadoo aan la eegayn dalka ay ka soo jeedaan, ay helaan waxbarasho. Waxaan nafteena u aragnaa in aan isku xirayno bulshooyinka iyo dhaqamada si waalidiintu ay si buuxda uga qayb qaataan waxbarashada carruurtooda."

Iyada oo la adeegsanayo khadka luqadda, TIS waxay waalidiinta LEP ka caawin kartaa dhanka Chinese, Af-Ruushka, Soomaaliga, Isbaanishka iyo Vietnamese si ay ugu xiraan dugsiyada ay carruurtoodu dhigtaan.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan TIS ama loogu talagalay dugsiyada si aad u ogaato sida loo codsado adeeg booqo [bogga aan ku leenahay website-ka PPS](#). Haddii adiga ama qof aad garanaysaa u baahan yahay helitaanka luqadda, wakiilada degmada ee TIS ayaa la helayaa kuwaasi oo loogu talagalay luqadaha soo socda:

- | | |
|--------------|--------------|
| • Isbaanish | 503-916-3582 |
| • Chinese | 503-916-3585 |
| • Af-Ruushka | 503-916-3586 |
| • Vietnamese | 503-916-3584 |
| • Soomaali | 503-916-3583 |
| • Kuwa kale | 503-916-3589 |